1A - XOOLAHA LUMA

Axmed Nuur

Sheekaba sheekaa keenta Inkastoo mowduuceenu ahaa baadigoob iyo raadgoob iyo noocaas, raadkii baa nala galay mowduuca, inkastoo odayaal waxgarad ah oo aad u yaqaana ay ka hadleen, su'aalna nala weydiiyey xaajigaa inoo dhameeyey oo anigu waan iskaga noqonayaa oon balbalaarinayaa mooyiye macnihii isagaa inoo dhameeyey.

Haddaba soomaalidu waxaa jira shan nin, shantaa oo mar nin isku darsado; mid waa Raad-yaqaan oo waa ninkaan sheegeynayoo raadka hadduu mar arko raad kale ugama darsamo, waa taan ka sheekeyneynay oo ninkii tuugga ahaayoo magaalada soo galayoo magaalada ku cusbaa dukaanka xadayoo dharka ka qaatay, ninkii Raad-yaqaanka ahaa ayaa loo keenay, markaasuu saa u fiiriyey oo yiri ninkan magaalada ma joogi jirin oo waa nin magaalada ku cusub. Markaasaa la yiri laba nin oo askar ah ayaa lagugu darayaaye ninkaa raadkiisa ha ka harin, wuxuu daba socdaba afartan kiiloomitir meel u jirta ayuu ninkii ka soo qabtay, isagoo xirxiran baa la keenay, ninkii magaciisa ma sheegayo waase nin la yaqaano. Fiqi Buraale waa kii isna sheegayey nin tuug ah yaa wax iga xaday buu yiri oo laba nin oo raad yaqaan ah yaan u yeeray, markay saa u fiirsheen ayey yirahdeen ninkan waa ina hebel hebel oo raadka ninkaasaa iska leh, ninkii ruuxiisii buu noqday. Haddaba raad-yaqaanku waa noocaas. Waxaa jira Dhalan-yaqaan, nin dadka saa u eegaya markaa wuxuu leeyahay ninkan wuxuu ku dhashay Baydhabo, ninkan wuxuu ku dhashay Bari, ninkan wuxuu ku dhashay Mudug, ninkan wuxuu ku dhashay Hiiraan, ninkan wuxuu ku dhashay Kismaayo, sidaa markuu u eegaba wuu sheegayaa, dhoobadooduu yaqaanaa, dadku sidii u koro iyo midabkuu leeyahay ayuu kala garanayaa, xoolahana dhalankoodu sidaasuu u yaqaana. Xoolaha ama lo' ha ahaato ama geel ha ahaato ama ari amaba kalluunka ruuxiisa dhalankaa lgu soocaa oo waxaan oran jirnay “Wallaahi kalluunkan kii joogi jiray maaha”.

Dad-yaqaan yaa jira, cilmigaan waa cilmiga (Antroboolijiya) la yiraa oo cilmi yaab leh weeye. Dad-yaqaanka, dadkuu yaqaanaa, qabiilkuu yaqaana, abtirsiiyuhuu yaqaanaa, dadku sey u kala hooseeyaan oo isugu xigaan yuu yaqaanaa. Waxaa jira nin la yiraa Bad-yaqaan, waxaa kaloo jira nin kale oo la yiraa Dhaqan-yaqaan, qofka markuu saa u eego dhaqankiisuu yaqaanaa oo wuxuu leeyahay ninkaasi waa reer hebel oo anaa aqaan dhaqankooda iyo sey u dhaqmaan, dhaqankaan waxaa laga dhaqmaa Bari, dhaqankan Kismaayaa lagaga dhaqmaa, dhaqamaduukala yaqaanaa oo qof kasta wuu soo saarayaa, hadduu arko nin kalluun cunaya oo doonyo uun ka sheekeynaya oo macawistii yareyd ugu jiro oo manta badda maxaa laga sheegay uun gurayaa waa reer Bari ayuu leeyahay, mar hadduu arko nin yaanba sito wuu garanayaa oo wuxuu leeyahay ninkaas waa beeraley oo dhaqamadooda ayuu soo saarayaa. Haddaba hadalka yaan ku dheeraanin sanboor yaan la fuuffuuf leeyahay raalli ahaada, halkaa ka ambaqaada, waxaan u gudbinayaa Fiqi Buraale.

Fiqi Buraale Horta arrintan aad ka hadleysaan; Dhalan iyo dhaqan aynu bal kala soocno. Bilmatel meel fogba ha ka doonina, waxaa jira Duunya-yaqaan iyo Dad-yaqaan iyo Dal-yaqaan iyo Dhaqan-yaqaan iyo Dhalan-yaqaan. Dhalan waa midab, oo midabkii waa dir-sooc oo waxay la socotaa hiddaha oo waa laba is huwan, dhaqannna waa raacaysaa midabna waa raaceysaa. Markaynu duunyada ka soo qaadno oo Baarqab wanaagsani geela kuu abaahiyo dirwanaagsan oo dirkii hebla layiraahdana ka soo jeedo xooggiisa marka la arko, quruxdiisa marka la arko, dhagisiisaasoo qorqoran marka la arko, waxaa la yiraahdaa waa xoolo dhalan wanaagsan oo Dir-sooc yaa la yiraahdaayoo halaasaa laga soo dir soocaa. Dhaqan markii la yiraahdo waxaynu eegnaa, bilmetel xoola Mudug jooga iyo xoolaha Hawd jooga markay isku yimaadaan markiiba waa la kala soocdi karaa, maxaa yeelay xoolaha daranta, ari ha ahaadeen, lo' ha ahaadeen, geel ha ahaadeen ka balbalaaran oo ka calool weyn xoolaha ciid ku kora, maxaa keenaaya? Waxaa keenaaya biyahaa badan, darata ay cunaayaan iyo waxaa yaa keenaya, kuwan kale ee jooga meesha oomanaha ah ee geedkaa kale cuna ee doogga uun cuna biyaha bandanna aan helin ka bog dhuuban xoolaha kale oo ugaar ayaad mooddaa oo iyaguna saasaa lagu soocaa. Ama dhalan sooc ha noqoto ama dir sooc ha noqotee horta saasaa wax lagu goobaa. Midna waxaa weeye deegaan, ninka beer ku barbaara ee fashay ee cunay xabuub ahaan u cunay, ee cambuulo ahaan u cunay, ee salool ahaan u cunay, ee soor ahaan u cunay iyo ninka caano ku soo koray way kala duwan yihiin. Bilmetel markaynu dabeecadda eegno, soomaalidu waxay ugu jeceshahay in ay cunto caano iyo hilib, waxaa jira dad soomaaliya oo caanaha iyo hilibkuba ay u yihiin goosaar oo aysan cunto u ahayn oo hadduu hilibkaa qura cuno calooshuba ku xanuuneyso ileen cunto uu cuno umaba yaqaano, qof waliba wuxuu ku soo barbaaray ayuu jecel yahay, waxaa nin laga soo weriyey, hadduu ninku bukoodo oo uu waayeel noqdo asaan hilbihiisu wadin, shan iyo toban jirka meeshuu ku soo gaaray ee uu ku soo koray ama caano ha ahaadeen ama hilib ha ahaadeen ama beer ha ahaadeen ama malay ha ahaadeene waa in loo celiyaa baa la yiri oo meeshuu seexan jiray ilaa shan iyo toban jirkiisii hadday bilcil hoostii tahayna waa in golgol loo dhigaa oo halkaa caano lagu siiyaa, waa ladnaanaayaa yaa la yiraahdaa. Ninku hadduu beer ku soo koray oo yaraantiisii xabuuq uu bilaabay oo marka sabuulkaasi baxo waakan ama cayriin ahaan loo cuno ama la dubto waa in la dhex seexiyaa oo la siiyaa yaa la yiraahdaa, waa daltabyo, sida xooluhu u daltabyoodaan yaa dadkuna u daltabyoodaa. Dhaqankii, ninka hadduu weligii ugaarsi ahaan jiray oo uu ku soo koray waa la garan karaa, ninka hadduu xoolo ku soo koray waa la garan karaa, ninka hadduu beer ku soo koray waa la garan karaa.

Iminka degaankaa kala duwa dadka iyo xoolahaba, bilmetel innagu dhulkan aanu ku soo kornay bannaan iyo buur iyo hawdba waa leeyahay, dadka buurta nala dabeecad maaha oo waa gooni, dadka nugaasha ku soo korayna nala dabeecad maaha oo waa nooc gooni ah, dadka hawd ku soo korayna waa nooc gooni ah, wixii oo dhanna waa isku dad, markaad hawdka iyo Nigaal dhaafto,

galbeedka waa nooc gooni ah, Hargeysa waa nooc gaani ah, buuraha Berbera waa nooc gooni ah, degaankii baa kala duwaya dadkii. Dadku waa isku dad, waana isku midab, waana isku af, waxaa laga yaabaa in eray aad si u taqaanno ay dad kale si kale u yaqaanaan oo lagu kala gartaa, eraygaa ayaaba ninkii kuu sooci kara ood ku garan kartaa ood tiraahdaa eraygakan ma lahaan jirine xaggee buu ka keenay. Marka afartan waa wax isku xiran, bilmetel Raad-yaqaan isagu waa gooni, ugaarsiga ninka u dhuumanaya iyo ninka xabbadda ku ridaya waa kala gooni, dabinka ninka dhigta waa kala gooni oo ninba si ayuu u yaqaanaa. Marka waxa weeye dabeecad dadku ku soo barbaaray. Midabka xoolaha haddeynu aragno, bilmetel Bakool haddeynu tagno xoolahoodu kala waaweyn, oo kala midab badan, qaar waa cadcaddaan, qaar guduud ayey u badan yihiin, qaar waxay u badan yihiin boodh, qaar waxay u badan yihiin isku dhaf fara badan. Bahalaha ruuxooda, bahalaha Nugaal ee bahasha hoosaha ah ee kuwa Mudug ama Galgaduud ama Hawd ama dhulkan Jawhar iyo gobolada dhexe ah bahalladoodu way kala duwan yihiin oo isku nooc ma ahan ciiddaasaana kala duwda. Bilmatal dharka aynu qaadanno, dadka meesha biyaha badan leh had iyo jeer dharkoodu waa cadcad yahay, timahoodu waa nadiif oo waa nooc gooni ah, dadka aan biyaha aan u badneynna had iyo goor dharkoodu waa ka gooni, dharka beertu had iyo goor waa ka duwan yahay dadka kale dharkiisa, sidaa dharkii u kala duwmay ayaa dharkiina noocyo kala noqonayaa, taasi waxaa keenta dabeecadda Antraboloojiya waxa lagu yiraa afka qalaad. Raadka ruuxiisa waa la garan karaa laakiin lama wada yaqaan. Sidaas ayaa ninna raar raa u yahay ninna raad gooniya ugu yahay oo ragbaa buurta isgoo aan raadkii arkeynin dhagaxaa raadkii ku raadinaya, dhagaxaa hadba sii dhacaaya.
Haddaba tusaalaha aan anigu ka bixiyey waa wax jira, waana wax dhalan sooc iyo dhaqan sooc iyo dir sooc iyo degaan sooc ku yimaada oo waxba hiddahay ku xiran yihiin waxna waxay ku xiran yihiin dhaqanka qofkaas uu ku soo koray, waana ka baxay ee Aw Daahir bal aan u gudbinno isagana.

Cali Mudiir — Xataa waxay gaareen dadka tinta midabkeena inay ku kala soocaan, joogga gaabida ama dhererka in ay ku kala soocaan, codka yaraan ama weynaan ama dhexdhexaad in ay ku kala soocaan, in ay ku kala soocaan midabka, arrimahaasoo dhan ayey gaareen dadka qaarkiis oo ay yiraahdaan ninkaas midabkiisa mar haddaan fiiriyey waa saas, codka waa caynkaas, isha midabkeeda, tinta, waxyaalkaas oo dhan. Bal hadde Xaaji Daahir Afqarshow meeshaas ka amba qaad, waad mahadsan tahay.

Daahir Afqarshe — Adaa mudan, waxyaabahan la is weydiiyey waxyaalo jira oo wada run ah weeye, waxaa gaar ah sidii uu Sheekh Maxamed Axmed Liibaan u sheegayey, qof qof cilmi gooni ah Ilaahay siiyey oo dadka gaarka ah waa jiraa, waxyaalaha kalena waa cilmi la barto oo la gaaro. Haddaynu raadka u leexanno, waxaa lagu kala gartaa, dhulka horta waa buur iyo bannaan, dadka bannaanka dega wuxuu u qeybsan yahay dhul ciid ah iyo dhul iska carra cad ah oo aan

raadku si fiican uga muuqan, meel meelna camuud cas leedahay oo raadka haddii xoolo kaa lumaan ama aad dad raadineysid marmarna aad heshaa marmarna aad weydaa, iyo dhul aadba wax raad ah aadan heleynin. Dhulka ciidda la yiraahdo ee carro guduudda ah ee Hawd ugu badan ee Soomaalida lexaadkeeduna dego iyo dhulka xeebta ah ee bacaadka leh dadka degaa ee ku barbaaray ee cagtiiyoo saani u soo baxaysa dad iyo duunyaba la arkay caalin bay ku noqonayaan, geel jiraha yaryar baa garanaya oo leh wallaahi waa hebla raadkan waayo waa wax maalin walba uu arkayey, iyadu cilmi sidaa u sii fog maaha. Dhulkaas carra caska ah raga xoolaha ku raaca nin weyn uun maahine badina dadka dhallinyarada ah waa kaba la’yahay.
Haddeynu xagga kale u leexanno dadkan soomaalida ah waa sidaad u sheegteene  bogcad walba dadka ku koray dadka kale waa ka duwan yahay, carrabka uu ku hadlayo qudhiisu iyada oo soomaali la wada yahay ayuu ku kala leexsan yahay oo ninkii bartay uu ku kala ogaanayo. Waxa kale oo jirta soomaalidu waxay tiraahdaa “Ninba intuu barqiyey wuu kaa badiyaa”, ka soo qaad booliiska, haddaad manta raboor u keento oo tiraahdo “Waa la i xadayoo waxaa iyo waxaasaa dhacay”, waxay ku weydiinayaan tuugada sidey u dhacday, anigu waa taan wax badan ka shaqeyn jiray hawshaas, meesha wax laga xaday, sida wax loo xaday yaa markiiba u kala soocan, war tuugtii caykaas ahayd maxaa inoo jooga, rag loo qoondeeyo oo ka shaqeeyoo dhar cad ah oo magac gaar ah leh way jiraanoo weynu wada ognahay, dadkaasna tuugtu waa u tirsan tahay illeyn waaba shaqadoodiiye, hebeh iyo hebel ayey leeyihiin. Kolkaasey kuwaa raafaan, sababtu waa maxay? Tuug ninka la yiraahdo maalinta u horreysa hadduu qof dacalkii wax ka furto weligii maceyshad kale ma yaqaanno dacalkii wuxuu ka furto maahee, ama boors qof sito uu jeexo, abtirsiimo gaar ah ayey leeyihiin markaa oo tuugtaasi waa nooc gooni ah, kuwa albaabada jebiya waa nooc gooni ah, kuwa aqal furan eegta waa nooc gooni ah, weligiiba meeshii ugu horreysay ee uu ka bilaabay uun buu cunayaa kolkaasaa xulufo xulufo yihiin, kolkaasey is raadsanayaan oo waa guruub guruub oo waa saaxiib saaxiib siday wax u cunaan oo ay isu raacsan yihiinna waa sidaas, raga ka shaqeeya siday wax u baadi goobaanna waa sidaas, waa cilmi gaar ah, kuwiiyaa la raadinayaa oo mid iyo laba in la qabto laga yaabee marqaatiyaa loo soo qabanayaa markaa. Waxa kale oo jira oo antarboloojigan lagu kala garanayaa oo kale isagana gaddeynu u soo noqonno, shan arrin ayaa Ilaahay u kala duway bani’aadamka, Ilaahay hadalka waa u kala duway oo qof walba marka uu hadlo waad garaneysaa qofkii aad tiqiin oo hebel baa hadlay weeyaan, afkii aan ku wada hadleynayna waa isku mid sowdkiina Ilaahay waa inoo kala duway, isagaa ku mahad leh. Wuxuu inoo kala duway gacanta wax lagu qoro, qorriinkaasoo xuruuftii isku wada mid tahay, marka hadhow la geliyo mishiinada wax lagu eego qof qof la far ihi ma jiro dadka Ilaah abuuray oo dhan. Suulkaas jeex jeexisa yare e aan imika muuqaneynin, ilmihi markuu saddex ayaamood jiro yaa suulkaas saa noqonayaa, markuu saddex ayaamood qabriga ku jiro yaa suulkaas

qayirmayaa, intaa u dhaxaysa qofku waa isku mid, qof qof la suul ahna ma aynu lihin. Shahwadana Ilaah waa inoo kala duway oo carruur isku wada mid ah baynu dhali lahayn, sidaa aynu u kala weji duwannahay, oo gacanta wax lagu qoro u kala duwannahay, oo shahwada u kala duwannahay, oo dhawaaqa u kala duwannahay oo haddana isku mid nahay oo isku jinsi nahay waa maslaxad Ilaahay inoo sameeyey. Matalan haddii hadda rasiid iyo wax la qorayo sababta qof waliba loo leeyahay adigu saxiix oo adigoo magaciisa dhigi karaya aadan dooneyn in aad dhigto haddii hadhow wax ka yimaadaan qofka wixii uu qoray ayaa loo eegayaa ama uu dafiraba, waa taa sababta wax loo saxiixo. Rag ayaa ashtako sameeyoo rag badan magacyadooda intey qoraan hadhow waa foorjari oo waa lagu xiri karaa haddii saxiix oolin. Shantaa Ilaahay wuu inoo kala duway oo kala wada gaar ayeynu nahay. Anigu waxaan ahaa raga faraha qaada oo muddo tiro badan ayaan ka shaqeynayey, waxaa laga yaabaa in aan si fiican wax uga aqaannaa. Cilmigaa ragga hore ugu maray waa ragga haddii ay helaan qof bani'aadam ah madaxiisa  oo meel yaalla oo gaboobay oo xabaalaha laga soo saaray jinsiyaddiisa waxa ay ahayd markay qalin ku yara dhig dhigaan ayaa shanta qaaradood meeshuu ka yimid ka soo boodayaa oo la leeyahay waa Afrikaan, waa Yurub, waa Eeshiya, waa Amriika qofkii markaasuu soo boodayaa jinsiyaddiisii waa cilmi iyadana la bartay oo la gaaray. Laftan ayaa wax muquununeysa oo hadhow la soo baxaysa timo. Marka cilmiyaashaas sida loo yaqaanaa kuwaasoo kale weeyaan, sidaan u kala duwannahayna sidaa weeye oo Ilaahay inoo kala sameeyey oon jaadjaadka u kala nahay. Carrabka qudhiisa, anigu dhowr good qof hadlaya oon kala baadinay aan gartay macaawino weynna aan ku helay habeen annagoo gudeyna waa iska badan yihiin, markaad u fiirsato qofkii aad taqaanay waad garaneysaa.
Bal anigu halkaasaan kaga harayaa Caliyow adiga lee waaye.

Cali Mudiir — Bal Dhegaweynow hadda adiguna bal ku kordhi wixii kuu baxay.

Dhegaweyne — Anigu raadkaan in yar idiinka taabanayaa iyo aqoonta soomaalida. Raadka anigu nin ciideed ayaan ahay, ciiddaa waxaa laga yaabaa in iyadoo xalay labaatan neef oo geela ay dareerto, intaan soo raad gooyo oo aan ka daba tago yaa suurtoobi jirtay, maxaa yeelay, waa geelaada raadkiisa oo waad kala tilmaansaneysaa, qaar ciddida yuu dhulka saa ugu jiidayaa oo aan labada ciddiyoodna ahaynee mid ah oo ama midka dibedda xiga ama kan gudaha ku jira ah, qaar beri horaa ragaad laga bixiyayoo cagta intaa dhaxaa go'an, raadkii markuu dhulka dhigo yaad arkeysaayood garaneysaa, ama ciribta dibedda ama gudaha ku jirta ay daacsan taay, markaa waad garaneysaa oo cagteedu waa kuu qiyaasan tahay, tilmaantii yaad halkaa ka qaadaneysaa, saasaad marka horaba geela raadkiisa u tilmaansaneysaa. Dadku waa la midoo qof markuu raadka dhulka ka qaadayo cagta yuu saa yiraahdaayoo ciidda ku qaadaa, ama far farta dhexe ah ama suulka mid uun baa ciiddii xaggaa u xarriiqaya. Qof waa soo gooyaa oo saasuu dhulka ugu soo gooyaa, qof suulka keliyuu dhulka ku gooyaa oo cagta kale kuma gooyo, dadbaa

faryarta kor u taagan tahayoo dhulka gaareynine afarta farood oo kalaa dhulka gaaraya. Horta cilmiga dadka reer baadiyaha ah wax ku doontaa waa caynkaa. Waxaa iigu cajaa'ib badan aniga aqoontaa, boqol waxarood oo wada cad cad ama boqol naylood oo gorod madow yaa gudcur dam ah laxi soo ciyeysaa ama gabar ama naag ama wiil yar baa la oranayaa rida ama laxda hebla ah neefkeedii keen, boqolkii kale ee ay wada dhasheenna xeradey ku wada jiraan ilmihii oo diray ama naagtii intuu ku fooraarsaduu soo qabanayaa, bal cajaa'ibkaa ka warran waana gudcur dam ah oon wax la arag. Neefkii yaryaraa ee ay wada dhasheen muxuu kaga gartay? Waa cilmi yaab leh, aqoonta dadku saasey u dheer tahay. Dadkan reer baadiyaha ahee ciidda jooga saasey u garanayaan oo marka horuu ka fiirsanayaa oo qofkaa raadkiisuu ka fiirsanayaa marka haddii aad qofka raadkiisa aragto waxaad oraneysaa raadkan waa kii hebel, geelii waxaad oraneysaa hasha halkan martay waa hebla. Bani'aadamka Ilaahay wuxuu abuuray iskuma eka, qofba cod gooni ah buu lleyahay, cag gooni ah buu leeyahay oo suurad gooni ah ayuu leeyahay. Maqadhana waa la mid oo xoolihii noo dhashay neef-neef ku qaldamaya ma leh Ilaahay waana isku ekeysiiyey waana kala ekeysiiyey oo wax lagu gartuu u kala sameeyey, intaa nee fee kuu dhalatay mid walba macna gooni ah ood ku garato buu leeyahay.
Dhirta dhulka ka baxda isku jaad ha ahaato haddana geed geed u eg ma leh oo geed walba si gooni ah ayaad ku garaneysaa; mid mid la eg ma leh, mid mid u eg ma leh, mid mid u qorax eg ma leh, waad garaneysaa. Ilaahay abuurtiisii wax lagu mahadnaqo weeye, dadkan reer baadiyaha ihina cilmigaa siyaadada ah ayey wataan oo ay ku kala garanayaan. Marka aan habeen gudcur ah guureyneyno, xoolahaa dadka ka caqli badan, markaan geela oran jirnay "Magool xeradii muuqan meysee muuta muuta iyo maley ku waddaa", markaan ku soo carraabino meel ay ah oo meel la maro aan lahayn, hal baa u hormareyso oo saad dabadaa uga waddo daf bay leedahay oo kadinkey ku geyneysaa. Marka caqligan xoolaha iyo dadka macna ay ku kala socdaan oo Ilaahay u sameeyey ayaa jira. Hoo bal Salaadow.

Salaad

Horta anigu inta raggaan sheegeen waxba ku kordhin mayo. Horta ariga iyo lo'da raadkooda haddaan wax idinkaga sheego waa been aan ka maarmi waayey. Aniguna sideyda shan iyo toban jir markaan ahaa baan baadiye ka soo tegey. Geela raadkiisa waan kala niqiin, waxaa raadkiisa lagu garan jiray halbaa cagteedu weyn tahay ama laba meelood ama saddex meelood ayey sida faraha firo u leeyihiinoo kale ayey ku leedahay, mid waxaa lagu garanayaa labadeeda suuloo hore ayaa dheer dheer, midna saantey hore u jiiddaa oo dhagaxda ayey horay u tuurtaa, hal iyana waa mid kaloo ama afar ama saddex meelood oo cagta lagu yaqaan ood mooddo in ay go'an tahay ama nabro ku leedahay ayaa iyana lagu garan karaa, hal barbar ayey suulka dhulka u gelisaa kan kalena waxaad is leedahay ma gaaro. Horta sidaasaa geela lagu raadiyaa, intaan anigu ka aqiin markaan baadiye joogay waa intaas. Dadka aad baa loo kala yaqaan oo qofna raadkiisa qof kale ku darmi maayo, raga

iyo dumarkana isku darmi mayo oo iyagu raadkoodu waa kala gaar, laakiin ragga adigu intaad taqaanay waxba kaagama darsami mayaan oo qof hebel waa kan raadkiisii yaad leedahay, waa familkii aad la dhaqmeysayoo meel kula seexaneysay, dadka kalena qofkaad aad u taqaan raadkiisa waa la garanayaa. Waxaa kaloo jira qof xoolo kaa xaday oo aad raadkiisa ku joogto, lugaha dadka hogofyo waa la yiraahdaa wagdo waa la yiraahdaa ninka lugaha godan leh raadkiisa gaar baad u garan kartaa. Ninkii lug la' kaasi waa iska caan oo waa la garan karaa, waxaa kaloo jira qof farihiisu soo kooban yihiin ama dhinac yuu u dhigaa ama ciribtaa qalloocan isagana waa lagu raadin karaa oo raadka dadka marnaba wax la aqoon waayo maaha.

Xoolaha isku si maaha, Matalan Mudug iyo Nugaal iyo dhulkaan Galgaduud la yiraahdo xoolahoodu kulli waa isku mid, ma kala taqaanid ninkii ku yiraahdo waa kala cayna oo anigu waan arkay, mar haddaad Baladweyne soo gaadho xoolahoodu waa cayn oo waa nooc gaar ah, webiga markaad soo gaarto waa nooc gaar ah. Carrada aan annagu ku barbaarnay geela jooga waa cayn gooni ah, reer koofurka yaa ku maahmaaha "Ninba dhulkuu ku dhashuu dhogortiisa leeyahay", wax waliba meesha ay ku dhasheen ama ku barbaareen ayey u eg yihiin.

Waxaa jira dad badan oo adiga Cali ah maanta haddii lagu yiraahdo dadkaas waa reer hebel dadka ay ku jiraan waad ka soo sooci kartaa oo waxaad leedahay "kanaa kan waa firkii reer hebel aad baan u garanayaa" waad soo sooceysaa, hadda ma taqaanidoo saddex afar oday ay kuugu dambeysay oo waad garan kareysaa. Xoolaha waxaa la yiraahdaa baarqabkii hebel ahaa ayaa dhalay ama dibigii hebel ahaa oo saas ahaa ayaa dhalay. Dadkana degaanka waa lagu kala garan karaa oo maanta qofkii Mudug ku dhashay iyo qofkii Nugaal ku dhashay  si kasta haddaad u fiiriso waad kala garan kartaa kan ku dhashay Baladweyne waad aqoon. Marka dabciga iyo dhaqankii yaa kala duwaya oo iskuma eka, sida xoolihii  u kala duwan yahay ayaa dadkana dhaqankii u kala duwan yahay. geela Ceelbuur iyo kan Buulabarde wixii ka sokeeya ma isku nooc baa? Jawaabti waa may islama eke ka, waa ka waaweyn yahay, afku waa soo rogan yahay, cagaha waa ka weyn yahay, hashii laba halaad bay la ek tahay. Haddaad Hargeysa dhaafto waad kala sooceysaa dadka Jabuuti iyo kuwa Hargeysa oo iskuma eka, marka ugu horreysaad kala garaneysaa. Haddaad Wajeer tagto waa lagaa soo soocayaa dadka ku dhaqan, uma ekid, waxaa lagu leeyahay ninkaan Bari ayuu ka yimid. Hadduu ruuxa dhulkaan ka tago waxaa la leeyahay ninkaan waa reer Banaadir, adiga Cali ah maanta Banaadiri ahaan laguuma soo qabanayo Mudug ayaa laguu soo qabanayaa, Daahir waxaa la leeyahay ninkan wuxuu ka yimid Nugaal ama waqooyi. Matalan adiga Cali ah dadka Baladweyne ama BuulaBarde ka yimid iyo kuwa Mudug waad kala sooci kartaa waana aragtay inta ay isku jiraan, waa isku dheggen yihiin. Bal anigu intaasaan ku joojiyey.

Cali Mudiir — Waxay ila tahay markan waa koobi doonnaa, waxaa mowduuceenu ahaa maantay baadi iyo baadi bixis waxayna ila tahay in aan

markan dhammeynay bal Abuu wixii aad rabto in aad ku darsato ku soo dhawoow.

Sh. Abuu

Caliyow waad mahadsan tahay waxaan ku daraayaa wax yar, horta kalmaddan baadida ee la sheegaayo “Dhejis dhulkii ku dhaladi dhogortiisa leeyahay  waa maahmaah dhulkaan koofur uu gaar ahaan u leeyahay oo annakaa iska leh gaar ahaan reer Abuu ayaa iska leh, waa tii Aw Daahir lahaa oo kale “Sedkaada lagama sabro sambab ba ha ahaadee”. “Dhejis dhulkii ku dhashaa dhogortiis aleeyahay”na waxaa laga wadaa dhogorta waa soo gashaa, saanqaadka waa soo gala, wax kasta waa soo galaan, tan aqoonta dadka oo hadda aan ku soconno, bil metel nin ayaa la leeyaay ninkaas gedef ayuu lahaa ama dalab ayuu lahaa ama ninkaas xandoof ayuu lahaa oo saanqaadkiisa iyo meeshuu maro waa lagu keeni karaa, iyo dadka deymadiisii, iyo dhogortiisii iyo hadalkiisii oo lau kala saarayo. Aniga Kismaayo ka soo bilow ilaa Baydhabo ama Buur ama Banaadir aad ayaa u kala saari karaa, Mudug iyo Bari waan isku dhibi lahaa laakiin xaggan koofur, Daafeed, Qoryooley, Buur, Baydhabo, Aw Dheegle, Marka, Qoryooley, Jilib iyo Jamaame dadkaas waa la kala saari karaayaa. Caliyow intaasaan ku dari lahaa oon ku joojiyey.